| JDF 432 | # Tilmaamaha Isbedelka Magaca Qofka Weyn |
|---|---|

## 1. Macluumaadka Aas Aasiga ah

- Waa inaad ka xaraysaa Codsi Gudbinta degmada aad degan tahay.
- Waa inaad tahay ugu yaraan 18 jir.
- Hadii aad leedahay danbi hore, isticmaal tilmaamaha isbeddelka magaca JDF 385 taas beddelkeeda.
- Waa inaad ku lifaaqdaa eegitaanka taariikhda danbiga faraha oo 90 maalmood gudaheed ah kahor inta aanad xaraynin.
- Degmooyinka qaar waxay u baahan yihiin dhagaysi kahor inta aan amarka lasoo saarin. Waydii Maxkamada nidaamkooda iyo sida aad u qabsan lahayd ballanta dhagaysiga.
- Iyada oo Maxkamad ay bixiso moojee ka dhaafid, waa inaad baahiso wargelinta isbedelka magaca kahor inta aan amarka lasoo saarin.
- Sharciga jihaynaya nidaamkan waa C.R.S. §§ 13-15-101, 102.

> **Fiiro gaar ah:** Si aad u bedesho magaca awowgaa kadib guurka ama xidhiidhka madaniga, uma baahnid nidaamkan. Kaliya ku xaree nuqulka la xaqiijiyey ee shahaadada hay'adda la xidhiidha.

**Sidoo kale waxaa ku jira Tilmaamahan:**


2. Tilmaame Talaabo-Talaabo ah — Bogga 2
3. Tibaaxaha Caamka ah — Bogga 4
4. Kharashka Xaraynta — Bogga 5
5. Liiska Foomamka — Bogga 5
6. Macluumaadka ADA — Bogga 5
7. Talo Sharci — Bogga 5

## 2. Tilmaamaha Talaabo-Talaabada ah

**Tibaaxaha lagu sharaxay bogga 4.**

### Talaabada 1 – Fara-dhigista

Ka qabso balanta fara-dhigista barta:
www.coloradofingerprinting.com

### Talaabada 2 – Eeg Taariikhda

Ka dalbo eegitaanka taariikhda danbiga faraha:

- ☐ Xafiiska Baadhitaanka Colorado (CBI); iyo
- ☐ Xafiiska Baadhitaanka Federalka (FBI).

Xasuusnaw:

1) Waa inaad **bilawdaa kiiskaaga 90 maalmood gudahood** taariikhda warbixinta.
2) Waa inaad keentaa nuqulada la xaqiijiyey in danbi aanad lahayn oo aanay muujin warbixinuhu.

### Talaabada 3 - Bilaw Kiiska

1) Buuxi waraaqaha bilaabidda:
   - ☐ JDF 433 – Codsi Gudbinta.
     **Lifaaq:** Eegitaanka Taariikhda iyo Xukunada Danbiga.
     **Fiiro gaar ah:** Eeg qaybta hoose si aad uga tanaasusho shuruudaha baahinta.
   - ☐ JDF 427 – Wargelinta Shacabka.
   - ☐ JDF 426 – Amarka Baahinta. (Kaliya samee qoraalka kiiska.)
   - ☐ JDF 448 – Amarka Ugu Danbeeya. (Kaliya samee qoraalka kiiska.)
2) Ka xaree Maxkamada Degmada ee degmada aad degan tahay.
3) Bixi kharashka lagu xaraynayo. Ka eeg Qaybta Kharashka wixii faahfaahin ah.

**Fiiro gaar ah:** **Ka Dhaafid Baahinta**

Codsi Gudbinta, waxa aad kaga dalban kartaa maxkamada inay ka tanaasusho Wargelinta Shacabka. Hadii aad tahay:

- Dhibane tacadiga ilmaha ama guriga **dhaxdiisa**;
- Ama aad u bedeleyso magacaaga si aad u waafajiso **aqoonsigaaga jinsiga**;

Waxa aad xaqiijisaa inaad ku qorto Codsi Gudbinta, su'aasha 9 hoosteeda. Mararkaas oo kale, Maxkamadu waa inay bixisaa ka dhaafidda. C.R.S. § 13-15-102(2), (4).

Talaabada 4 – Dhagaysiga *(mararka qaar)*

Inkasta oo badanaa ayna maxkamaduhu qaban dhagaysi, qaar ayaa qabta. Hadii ay sidaa tahay:

1) Maxkamadu waxay kusiin doontaa wargelinta taariikhda iyo saacada dhagaysiga.

2) Waxa aad timaadaa wakhti hore si aad u hesho qolka ood sii dhamaysato hubinta amaanka.

3) Xaakinku waxa uu eegi doonaa waraaqahaaga, ku waydiin doonaa wixii su'aalo ah ee uu qabo, oo waxa uu amri (ama ka dhaafi) doonaa baahinta.

Talaabada 5 – Baahinta

Iyada oo ay Maxkamadu ka tanaasusho moojee, waa inaad bixisaa Wargelinta Shacabka magaca la soo jeediyey.

1) Waa inaad ku baahisaa ugu yaraan sadex jeer mudo 21 maalmood ah wargeys sumcad fiican leh.

2) U gee wargeyska nuqulka maxkamada ee saxeexan *JDF 426 – Amarka Baahinta*.

3) Marka la dhamaystiro, wargeyska ayaa ku siin doonaa waraaqaha baahinta. Ama, ka samayn doona nuqulada baahin kasta cadayn ahaan.

☐ Waxa aad ka xaraysaa cadaynta baahinta kiiskaaga.

Talaabada 6 - Amarka Ugu Danbeeya

Marka aad xarayso cadaynta baahinta, ama hadii Maxkamadu ay ka tanaasusho baahinta:

1) Maxkamadu waxay kuusoo diri doontaa Amarka saxeexan.

2) Waxa aad dalban kartaa nuqulo la xaqiijiyay oo aad ka bixiso kharash.

3) U dir nuqul ama nuqulka la xaqiijiyay wixii ganacsi ama hay'ad dawladeed ah si ay uga muuqato isbedelka magacaagu duwaankooda.

Tusaaleyaasha:

Waaxda Gaadiidka Liisankaaga Dirawalnimo awgii
Karaaniga Degmada iyo Duwaan Hayaha wixii hanti ah ee aad leedahay awgeed.
Wasaarada Maraykanka ee Baasboorada.
Xafiisyada Warbixinta Daynta. Iyo wixii la mid ah.

## 3. Tibaaxaha Caamka ah

| | |
|---|---|
| Qoraalka Kiiska | Sanduuqyada dhakada sare ee foomka. Waxaa ku jira cinwaanka maxkamada, magacyada dhinacyada, macluumaadka xidhiidhka ee dacwad xareeyaha, iyo lambarka kiiska. |
| Codsi Gudbinta | Dokumentigu waxa uu si rasmi ah u bilaabaa nidaamka Isbedelka Magaca. |
| Codsi-gudbiye | Qofka samaynaya Codsi Gudbinta Isbedelka Magaca. |
| Wargelinta Shacabka | Isbedelka magaca waa in lagu baahiyaa ugu yaraan sadex jeer mudo 21 maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda amarka wargeyska sharciga ah ee degmada kiiskan laga xareeyay. |
| Dhici kartaa | Sharci ahaan, "dhici kartaa" waxaa lagu qeexaa "ikhtiyaar" ama "awoodid." |
| Waa in | Sharci ahaan, "waa in" waxaa lagu qeexaa "loo baahan yahay." |

## 4. Kharashka

| | |
|---|---|
| Kharashka Xaraynta | $98 – Maxkamada Degmada *(ikhtiyaarada ugu caansan)* |
| | $268 – Maxkamada Degmada *(nidaam la mid ah, ka qaalisan)* |
| Nuqulka La Xaqiijiyay | $20 |

**Si aad u Codsato ka Dhaafid Kharash Maxkamadeed**

Foomamka Xaraynta:

- ☐ JDF 205 - Mooshinka ka Dhaafidda Kharashka.
- ☐ JDF 206 - Amar. (Kaliya samee qoraalka kiiska.)

Ama, haddii aad qaadato dheefaha dadwaynaha qaarkood, xerayso:

- ☐ JDF 209 – Wargelinta Ka Dhaafista Kharashka.

Waa inaad sidoo kale bixiso wixii kharash ah oo aad siiso hay'adaha eegitaanka faraha, taariikhda danbiga *(CBI/FBI)*, iyo kharashka baahinta wargelinta isbedelka magaca *(wargeyska)*.

## 5. Dhammaan foomamka *(Siday tirooyinku u kala horeeyaan ah)*

JDF 426 – Amarka Baahinta.
JDF 427 – Wargelinta Shacabka.
JDF 433 – Codsi Gudbinta.
JDF 448 – Amarka Ugu Danbeeya.

## 6. Macluumaadka ADA

Wixii qaabilaad macquul ah sida uu dhigayo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah, la xidhiidh isku duwaha ADA ee maxkamada deegaanka.

## 7. La-talinta Sharci

Kuwani waa tilmaamo aasaasi ah oo kaliya macluumaad ahaan loogu talogalay. Maaha talo sharci. Hadii aad doorato in aad naftaada matasho, waxa ku qabanaya shuruuc iyo nidaam la mid ah kuwa looyarka qabta. Hadii aanad fahmin macluumaadkan, fadlan la xidhiidh looyar.